

Xogta Baaritaanka iyo la Socoshada Kobaca oo loogu talagalay Waalidiinta

Manfacyada Baaritaanka iyo la Socoshada Kobaca/Korniinka ee Carruurta Yaryar

MAXAY:Waa Maxay Kobaca Ubadka?

Kobaca ubadka waxaa loola jeedaa sida ubadkaaga uu u korayo kaas oo ay ka mid yihiin sida, shucuurta bulshada, fahamka, iyo kobaca luqadda.

Waa maxay Gaarida Kobaca?

Xirfaddaha sida saanta ugu horeyso uu qaado, dadka oo loo dhoolo caddeeyo, iyo gacanta la haatiyo marka la kala tagayo iyo dhallaanka oo yiraahda haye ayaa waxaa loogu yeeraa gaarida kobaca. Sida ubadkaaga uu wax u baranayo, u hadlayo, iyo uu u ciyaarayo waxay sheegaan xog muhiim ah oo ku saabsan kobca ubadkaaga. Gaarida kobaca ayaa ah waxyaabo carruurta badankooda ay samayn karaan marka ay da' qaar ah ay gaaraan.

Waa maxay korniin habsaama?

Korniin habsaama waa goorta ubadkaaga uusan gaarin kobaca laga rabo marka uu da' qaar ah uu gaaro.

Waa maxay Baaritaan Kobaca?

Baaritaannada kobaca waa hababka xirfadlayaasha ay u go'aamin karaan haddii ubadka uu gaarayo kobaca laga rabay ama haddii ay u baahan yihiin taageero dheeraad ah.

SABAB:Maxay tahay sababta ay Muhiim u Tahay Baaritanka Kobaca?

Baaritaanka kobaca waa muhiim maxaa yeeley waxay kaa caawin karaan in aad u dabaaldegto goorta dhallaankaaga uu gaaro halka kobaciisa ama kobaceeda laga rabay inay joogto. Waxaa kaloo muhiim ah maxaa yeelay waxay kaa caawin kartaa in aad ogaato haddii ubadkaaga uu u baahan yahay taageero dheeraad ah. Taageero goor hore la bixiyo waxay horseedi kartaa inay ka soo baxaan natiijo wanaagsan inta ubadkaaga uu korayo.

SIDEE: Haddii aad qabto wax welwel ah ama su'aallo ku saabsan kobaca ubadkaaga oo aad danaynayso baaritaan kobaca, waxaad ula xiriiri kartaa dhakhtarkaaga ilmaha, [Waaaxda Caafimaadka ee Degmadaada, https://www.tn.gov/health/health-program-areas/localdepartments.html](https://www.tn.gov/health/health-program-areas/localdepartments.html), ama [your local TEIS](https://www.tn.gov/education/early-learning/tennessee-early-intervention-system-teis.html) [Nidaamka Dhextaalka Hore ee Tennessee] (*Tennessee Early Intervention System*) <https://www.tn.gov/education/early-learning/tennessee-early-intervention-system-teis.html>, iyo carruurta 3 sano jirka iyo kuwa ka wayn, waxaad ula xiriiri kartaa [Adeegyada Taageerada Iskuulka ka Jira, https://www.tn.gov/education/early-learning/school-based-support-centers.html](https://www.tn.gov/education/early-learning/school-based-support-centers.html) ee nidaamka iskuulka xaafaddaada.

Xog kale oo dheeraad ah oo ku saabsan Baaritaanka iyo la Socoshada Kobaca, fadlan xariiriyaha [link] soo socda ku dhufo:

Xogta Baaritaanka iyo la Socoshada Kobaca oo loogu talagalay Waalidiinta

- [Wakhtiga la Gaarayo - Baro Calaamaddaha. Tallaabada Hore](https://www.cdc.gov/ncbddd/actearly/pdf/parents_pdfs/milestonemomentseng508.pdf)
https://www.cdc.gov/ncbddd/actearly/pdf/parents_pdfs/milestonemomentseng508.pdf
- [Liis Warbixinneedka Gaarida Kobaca](https://www.cdc.gov/ncbddd/actearly/pdf/checklists/all_checklists.pdf)
https://www.cdc.gov/ncbddd/actearly/pdf/checklists/all_checklists.pdf
- [Baro Wax Badan oo ku Saabsan Kobaca Ubadkaaga: Baaritaanka iyo la Socoshada Kobaca](https://www.cdc.gov/ncbddd/actearly/pdf/parents_pdfs/developmentalscreening.pdf)
https://www.cdc.gov/ncbddd/actearly/pdf/parents_pdfs/developmentalscreening.pdf